



VAERS ((Nidaamka Ka Warbixinta Waxyeelada Tallaalka)

Waa maxay VAERS

VAERS waa nidaam kajiro dalka oo dhan kaasi oo lagu soo ururiyo warbixinno la xiriira waxyeellooyinka caafimaad ee ka dhasha tallaalka. Nidaamku wuxuu kuxiranyahay dadka soo tabinaya waxyeellooyin daran. Badanaa rugaha caafimaadku ayaa soo gudbiya warbixinno, laakiin qof kastaa wuxuu ku soo gudbin karaa warbixin onlayn ama foomam la buuxin karo.

Waxyeellooyinka daran waxay u dhexeeyaan kuwa fudud (gacmo xanuun, cuncunka goobta cirbadda lagi muday, iwm.) iyo kuwa aad u daran sida falcelin xasaasiyadeed iyo xitaa dhimasho. Waxyeellooyinka daran ayaa la soo sheegaa haddii loo maleynayo in tallaalka sababay iyo haddii kaleba.

Bixiyayaasha daryeelka caafimaad ayaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan warbixinnada dhacdooyinka qaarkood sida ku xusan liiska soo-saaraha ee daawaynta aan la isticmaali karin, iyo sidoo kale dhacdooyinka aadka u daran sida dhimashada iyo ciladaha dhalmaada ee haweenka uurka leh.

Bixiyayaasha tallaalka COVID-19 waxaa looga baahan yahay inay soo sheegaan khaladaadka bixinta tallaalka, dhacdooyinka halista ah iyo kiisaska COVID-19 tallaalka kadib ee keena isbitaal dhigid ama geeri.

Muxuu nidaamka VAERS muhiim u yahay?

Tallaalada si fiican ayaa loo tijaabiyaa kahor inta aan la ansixin, laakiin nidaamka VAERS wuxuu soo bandhigi karaa qaabab aan horey loo ogaan iyo waxyeellooyinka talaalka.

Nidaamka VAERS ma go'aamin karo in tallaalku sababay ama uusan sababin dhacdada daran. Dadka la tallaalay weli waxay la bukaan karaan sababo kale oo aan la xiriirin tallaalka.

In kasta oo nidaamka VAERS uusan sheegi karin inuu tallaalku sababay dhacdada daran iyo in kale, wuxuu siin karaa Xarumaha Xakamaynta iyo

Kahortagga Cudurrada (CDC) iyo Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA) macluumaad muhiim ah oo laga yaabo inay dhibaataada muujiyaan.

Haddii ay u egtahay in tallaalka uu sababi karo dhacdo daran, FDA iyo CDC ayaa sii baari doona.

Nidaamka VAERS waa nidaamka keliya ee [u gaarka ah daawada](#) ee ka warbixinaya dhacdooyinka daran ee la xiriira. Badbaadada ayaa si aad ah loogu qiimeeyaa tallaalada marka la barbardhigo dawooyinka kale.

Sideen u heli karaa nidaamka VAERS?

Dadka doonaya inay soo gudbiyaan dhacdooyinka daran kadib tallaalka ama rabo helitaanka xogta nidaamka VAERS waxay booqan karaan bogga: <https://vaers.hhs.gov/>

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacadda balaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.